**Degdeg u Baahi**

# Kenya: Xadgudubka Booliiska ee Qaxootiga Soomaalida

***Dawladda, Qaramada Midoobay, Deeq Bixiyayaasha Waa Inay Wax Ka Qabtaan Qalalaasaha Baahsan, Xarigga xurmotirka leh, Baadda iyo Shaqada Fashilantay ee Booliiska***

(Nayroobi, Juun 17, 2010) – Ciidanka booliiska Kenya ee ku sugan xuduudda Soomaaliya iyo xeryaha qaxootiga ee u dhow waxay ku xadgudbaan dadka magangelyodoonka ah iyo qaxootiga ka soo cararaya dalka dagaalladu halakeeyeen ee Soomaaliya, sidaasi waxa sheegtay hay'adda Ilaalinta Xuquuqda Aadanaha Human Rights Watch warbixin ay baahisay oo maanta soo baxday. Kenya waa inay degdeg wax uga qabataa booliiskeeda xadgudbaya, sidoo kale hay'adda qaxootiga Qaramada Midoobay waa inay dardar gelisaa la socodka xaaladda ayna dalbataa in la joojiyo xadgudubyada dhacaya, ayey tiri Human Rights Watch.

Warbixinta oo ka kooban 99 bog waxay ku salaysantahay waraysiyo lala yeeshay in ka badan 100 qof oo qaxooti ah, waxana cinwaankeedu yahay, "'Ku Soo Dhawow Kenya': Xadgudubyada Booliisku u Gyastaan Qaxootiga Soomaalida," waxayna diiwaangelisay xadgudubyo ay ka mid yihiin qaadashada lacago baad ah oo si baahsan u dhacda booliiskuna ay kula kacaan dadka magangelyodoonka ah ee isku dayaya inay soo gaadhaan saddexda xero qaxooti ee u dhow magaalada Dadaab ee Kenya oo ah xerada dejinta qaxootiga ee ugu ballaadhan caalamka. Booliisku waxay adeegsadaan gacan ka hadal, qabqabasho aan kala-sooc lahayn, xarig aan sharci ahayn oo ku dhaca si sharaftir leh iyo si aan bani'aadminnimo ahayn, ku hanjabid masaafurin, iyo in si qalad ah dacwad loogu soo oogo iyadoo lagu eedaynayo "joogitaan sharcidarro ah" iyadoo ujeeddada ka dambaysana tahay in lacago baad ah laga qaato dadka cusub – oo isugu jira rag, dumar iyo carruur. Xaaladaha qaarkood booliisku waxay kufsadaan dumarka. Horraantii sannadka 2010 oo keliya, boqollaal qof, haddiiba aysan ahayn kumanaan qof oo Soomaali ah oo awoodi waayey inay iska bixiyaan lacagaha baadda ah ayaa dib loogu celiyey Soomaaliya taasoo ah xadgudub ula kac ah oo lagu xadgudbayo xeerka u degsan Kenya iyo kan caalamiga ahba.

"Dadka ka cararaya jaha-wareerka Soomaaliya oo intooda badan yihiin dumar iyo carruur ayaa markay Kenya soo galaan lagu soo dhoweeyaa kufsi, shaabuugayn, garaacis, xarig, baad iyo masaafurin aan kala sooc lahayn," ayuu yiri Gerry Simpson, Cilmi-baaraha Arrimaha Qaxootiga ee Human Rights Watch oo isgau qoray warbixintan. "Marka ay xeryaha soo gaadhaan, qaxootiga qaarkood waxay gacan ka hadal kala kulmaan booliiska, iyadoo booliisku ay iska indhotiraan xadgudubka dhinaca galmada ee ay ku kacayaan qaxootiga kale iyo dadka degaanka ee reer Kenya."

Tobannaan qof oo magangelyodoon ah oo ka mid ahaa dad lagu qiyaasay 40,000 Soomaali ah oo ka soo gudbay xuduudda rasmi ahaanta u xiran ee Kenya ee u dhow xeryaha muddadii afarta bilood ahayd ee ugu horraysay sannadka 2010 ayaa Human Rights Watch u sheegay in booliisku iska dhegotireen cabashadooda ahayd inay si xor ah uga gudbaan xadka. Taas beddelkeeda booliisku waxay ka dalbadeen lacag, iyagoo haddii ay iska bixin kari waayaanna kula kaca masaafuris ama xabsi, garaacis iyo inay si been-abuur ah ugu dacweeyaan joogitaan aan sharci ahayn. Qof shaqaale ah oo qaabilsan gargaarka qaxootiga oo Kenya u dhashay ayaa hawlgalka ay booliisku ka hayaan inta u dhaxaysa xuduudda iyo magaalada Garissa ee xarunta gobolka ku tilmaamay "makiinad weyn oo lacagta samaysa."

“Ku Soo Dhawow Kenya” waxay kaloo diiwaangelisay siyaabaha hanjabaadda ah iyo qoorgooyada booliiska oo ah in meel dhexe laga qabto iyo xadgudubyada kale ee la midka ah ay dadka magangelyodoonka ah ugu qasbaan inay qaadaan waddooyin yaryar oo ay ka fogaadaan waddooyinka waaweyn markii ay u soo socdaan xeryaha. Waxay kaloo dadkaasi u nugul yihiin weerarro uga yimaada dambiilayaasha kale ee caadiga ah oo ka faa’iidaysta iyagoo kula kaca kufsi iyo inay ka xadaan xoogaaga lacagta ah ee ay haystaan.

Markii ay xeryaha soo gaadhaan, qaxootigu waxay weli la sii kulmaan gacan ka hadalka booliiska sida ay warbixintu qortay. Booliisku waxay ku guuldarraysteen inay ka hortagaan, baadhaan ayna sharciga la tiigsadaan kuwa gaysanaya xadgudubka galmada ka dhanka dumarka iyo gabdhaha ku jira xeryaha xadgudubkaasoo ay gaystaan dadka kale ee qaxootiga ah iyo dadka kale ee Kenya u dhashay, iyadoo uu abuurmay hab-dhaqan oggolaanaya inaan la isla xisaabtamin taasoo sii kordhisay inay dhacaan xadgudubyada galmada.

Warbixintu waxay kaloo baadhitaan ku samaysay siyaasadda Kenya ee sharcidarrada ah ee qaxootiga ka diiwaangashan xeryaha badankooda ka mamnuucaysa inay u safraan qaybaha kale ee Kenya haddii aysan wadanin oggolaansho khaas ah aysanna la iman sababo ay ka mid yihiin kuwo caafimaad ama waxbarasho oo ay ka leeyihiin Nairobi. Sida uu dhigayo sharciga caalamiga ah, Kenya waa inay cudurdaar u haysataa mamnuucista caynkaas ah sababtoo ah waxa ay u cuskan karto waa ilaalinta amniga qaranka, xasilloonida dadweynaha, ama caafimaadka dadweynaha oo ay kuu guuldarraysatay inay hirgeliso. Sannadkii 2009, mas’uuliyiintu waxay oggolaadeen keliya 6,000 qof oo ka mid ah dadka ku nool Dadaab oo dhan 300,000 qaxooti ah inay ka baxaan oo ay ka safraan xeryaha dac-darrada iyo buux-dhaafku iskugu darsameen.

Warbixintu waxay kaloo diwaangelisay sida ay booliisku u qabtaan dadka qaxootiga ah ee socdaalaya iyagoon wadan – iyo weliba kuwa wata “waraaqaha dhaqdhaqaaqa” ee ay dawladdu soo saarta – taasi oo sii kordhaysa, iyagoo lacag baad ah ka qaata, xaaladaha qaarkoodna geeya maxkamad ku taalla magaalada Garissa, halkaasoo lagu ganaaxo ama xabsi loo diro.

“Ku Soo Dhawow Kenya” waxay ku qanacsan tahay in qaabka habaysan ee ay ku socoto fadeexadda baadda iyo xadgudubka ah ee booliiska – oo dhereran dhul dhan ilaa 200 kilomitir laga bilaabo magaalada xadka ku taalla ee Liboi ilaa magaalada Dadaab  ilaa laga gaaro Garissa – ay si toos ah uga soo unkantay go’aanka saddex sano jirsaday ee ay Kenya ku xirtay xadka. Human Rights Watch waxay sheegtay in arrin kale oo taasi la xiriirta oo ah xiritaanka xarunta qabashada ama baadhitaanka qaxootiga ee ku taallay magaalada Liboi, oo 15 kilomitir u jirta xadka isla markaana 80 kilomitir u jirta xeryaha qaxootiga, inay xaaladdii sii xumaysay.

Ka hor intii aan la xirin, xarunta qabashada ee Liboi waxay ahayd goob ammaan ah oo badi magangelyodoonayaasha Soomaalida ah ay ugu horraynba gabbaad ka raadsan jireen markay Kenya soo galaan, halkaasoo Hay’adda Qaxootiga Adduunka (UNHCR), ay iyaduna ka qaadi jirtay si loo geeyo xeryaha. Xaruntaasi la’aanteed dad lagu qiyaasay 300,000 Soomaali ah oo dalkooda ka soo cararay soona galaya Kenya tan iyo sannadkii 2007 – kuwaasoo kala-badh ay tageen xeryaha qaxootiga – waxay dantu ku kalliftay inay adeegsadaan dad kontarabaan ahaan uga soo gudbiya xadka. Booliisku waxay ka faa’iidaystaan safarkaasi qarsoodiga ah, iyagoo si

been abuur ah dadka ugu eedeeya inay sharcidarro ku soo galeen Kenya uguna hanjaba qabasho haddii aysan bixin lacagta ay booliisku dalbadaan.

Sida uu qorayo Xeerka Qaxootiga Kenya, dhammaan dadka magangelyodoonka ah waxay haystaan 30 maalmood kadib marka ay soo galaan Kenya inay u safraan goobta ama mas'uuliyiinta qaxootiga ee ugu dhow si ay qaxooti ahaan isku diiwaangeliyaan, iyadoo aan la eegayn qaabka ay ku soo galeen iyo goobta ay ka soo galeen dalka. Laakiin booliisku si joogto ah ayey xuquuqdan iskaga indhotiraan. Warbixinta oo ku halqabsanaysa talooyinka ay hay'adda Human Rights Watch u gudbisay mas'uuliyiinta Kenya oo ku qornaa warbixintii soo baxday Maarso 2009 cinwaankeeduna ahaa, Naxdin ka Guur Rajo La'aan u Guur "From Horror to Hopelessness," waxay mare kale ku celinaysaa baaq ay ugu jeedinayso mas'uuliyiinta inay xarun cusub ka furan magaalada Liboi halkaasi oo qaxootiga cusub lagu nidaamin karo isla markaana si nabadgelyo leh looga daadgurayn karo si loo geeyo xeryaha qaxootiga.
.
"In ka badan saddex sano xadka xidhan ma jiro cid uu u faa'iideeyey aan ka ahayn saraakiil booliis oo musuqmaasuq ah waxana uu horseeday xadgudubyo aan laga weli laga sheekaynin oo loo gaystay boqollaal qof, haddiiba aysan ahayn kumanaan dad oo magangelyodoon ah," ayuu yiri Simpson. "Kenya waa inay dammaanad qaadaa inay qaxootigu nabad ku soo gudbaan ayna ilaalisaa qaxootiga Soomaalida ah ee baylahsan."

Dawladda Kenyan waxa horyaalla walaac dhinaca amniga ah oo jira marka la eego khilaafka Soomaaliya, hase yeeshee  hadallada siyaasadeed ee Soomaalida ka dhanka ah waxay sii xoojiyeen keliya habdhaqanka xadgudubku ku dheehan yahay ee booliiska, ayey tiri Human Rights Watch. Dadka magangelyodoonka ah waxay sheegeen in booliisku ay ku eedeeyaan inay ka tirsan yihiin kooxda Al-Shabaab ama Al Qaeda, ama inay yihiin "argagixiso" ka hor inta aan – sida dhacda xaaladaha qaarkood – si qasab ah dib loogu celin Soomaaliya. Iyadoo soo qaadanaysa siddeed kiis oo ka mid ahaa 152 qof oo si qasab ah dib loogu celiyey Soomaaliya oo ay diiwaangelisay Human Rights Watch intii ay samaynaysay cilmi-baaristan bishii Maarso 2010, Human Rights Watch waxay aaminsan tahay inay suurtogal tahay in booliisku ay dib u celiyeen boqollaal qof, haddiibay aysan ahayn kumanaan, Soomaali ah oo dib loogu celiyey dalkoodii horraanta sannadka 2010 oo keliya.

Xeerka caalamiga ah waxa uu mamnuucayaa in si qasab ah qaxootiga dib loogu celiyo goob ay kala kulmayaan ciqaab, jirdil ama qalalaase guud. Inkastoo Kenya ay xaq u leedahay inay dad gaar ah ka hor istaagto inay soo galaan ama jogaan Kenya – oo ay ku jiraan kuwa caadiyan loo tixgelinayo inay halis ku yihiin amnigeeda qaranka, sida xubnaha al-Shabaab – haddana waa inaysan xuduudda ka xidhanin magangelyodoonka. Xeerka caalamiga ah waxa kaloo uu ka mamnuucayaa mas'uuliyiinta inay magangelyodoonka dib ugu masaafuriyaan Soomaaliya iyagoon marka hore u oggolaanin inay magangelyo codsadaan.

"Booliisku waxay sheegeen inay Kenya ka difaacayaan argagixisada ayna xoojinayaan sharciyada socdaalka marka ay qaxootiga joojinayaan," ayuu yidhi Simpson. "Balse xaqiiqada ah inay baad ka qaataan Soomaalida si ay uga gudbaan kontoroollada ama looga sii daayo xabsiyada booliiska waxay tilmaamaysaa inay booliisku ka walaacsan yihiin jeebkooda ee aysan xad ilaalinayn."

Warbixintu waxay ugu baaqaysaa hay'adda qaxootiga ee Qaramada Midoobay inay hagaajiso la socodkeeda ayna xaaladda la soo qaado mas'uuliyiinta iyo inay si joogto ah u booqdaan saldhigyada booliiska ee u dhow xuduudda, magaalooyinka Dadaab iyo Garissa.

Marka la eego dhinaca xadgudubka galmada, dhibbanayaashu waxay u sheegeen Human Rights Watch inay booliisku iska dhegotiraan cabashadooda, ama ku dhahaan soo caddeeya, ama ay kiiska laalaan iyagoon wax sharraxaad ah ka bixinin. Marmarka dhifka ah ee ay booliisku qabtaan kuwa lagu eedaynayo inay xadgudubka gaysteen badanaa kuwa la tuhmayo waxaa lagu sii daayaa saacado ama maalmo gudohood, iyadoo aan rajo kale oo badan laga qabin in su'aalo ama xisaabtan kale oo dheeraad ah lala dabagalo. Haween badan waxay aamisan yihiin in eedaysanayaasha xadgudubka u gaystay ay ku guulaystaan inay laaluushaan booliiska si ay baadhitaanka uga hadhaan amaba ay u sii daayaan.

Human Rights Watch waxay sheegtay in ka sokow jawaabta dawladdu ka bixisay xadgudubka galmada oo soo hagaagayay tan iyo horraantii 1990-meeyada, haddana in dadaalka dawladda ee xeryaha qaxootiga uu guuldarraysto sababtoo ah booliiska leh xirfadda baadhitaanka dambiyadan ee jooga xeryaha tiradoodu way yar tahay, waxana jirta sabab kale oo ah in komeerista booliiska lagu kormeero maamulista kiisaskan aanay ahayn mid ku filan.

"Inkastoo ay xeryahan dhisan yihiin ku dhowaad labaatan sano, haddana caddaalad ay helaan dhibannayaasha kufsiga waa wax reeban waxaana sharci noqotay inaan lala xisaabtamin kuwa xadgudbaya," ayey tiri Meghan Rhoad, cilmi-baare ka tirsan Qaybta Xuquuqda Haweenka ee Human Rights Watch, oo qortay qaybta warbixintan ee ka hadlaysa xadgudubka galmada. "Haweenka iyo gabdhaha qaxootiga ah ee sida geesinnimada leh ugu dhiirrada inay xadgudubyada galmada usoo sheegaan booliiska waxay u qalmaan in sidan loo dhaamo."